Su,aalo iyo jawaabo ku saabsan Corona iyo iskuulka iyo xanaanada ama barbaarinta .

Hadii ilmahaygu leeyahay wax yar oo calaamad hargab ah ma joogi karaa guriga?

Haa, qof kasta oo leh calaamad, xataa mid yar, waxaa uu ubaahanyay inuu ka fogaado la kulanka bulshada kaasoo fidin kara khatarta caabuqa sida ay sheegtay Hay'ada caafimaadka dadwaynaha (Folkhälsomyndigheten).

Caruurta caafimaadka qabta waxaa lagu talinayaa inay tagaan xanaanadada iyo iskuulka.

Caruurta buktaa waxay joogi karaan guriga hadii waalidku sidaas go,aansado.

Sidee looga hortagi karaa dusiyadeena iyo xanaanooyinkeena si la iskaga ilaaliyo inuu ku fido caabuqa fayraska Corona?

Dugsiyadeenu waxay wadaan ka hortag guud si la isaga ilaaliyo fiditaanka caabuqa.

Ka hortaga caabuqyada neef-mareenka waa in la iska ilaaliyo inaad taabato wejigaaga ama indhahaaga waana inaad ka fogaato la kulanka dadka buka.

Gacmahaaga markasta ku maydh biyo diiran iyo saabuun cuntad ka hor, cunto karinta iyo makaad musqusha booqatid.Alco gel waa dareeraha Aalkolada oo aad bedelkeeda gacmaha ku maydhi karto .

Qufaca iyo hindhisada u isticmaal xagashaada gacanta ama maro iyo iwm,caabuqu wuu ka yaraan doonaa inuu gacmaha wasakheeyo.

Xanaanada ama barbaarinta ilma kastaa waa inuu gacmihiisa dhaqo marka ay dugsiga yimaadaan.

Isu imaatinka wayn iyo safarada waa la joojiyey.

Waa maxay sababta loo xidhi waayey dugsiyada xanaanada iyo iskuulada?

Waxaynu raacaynaa talooyinka Hay,adda caafimaadka dadwaynaha (folkhälsomyndigheten), iyaguna hada ma arkaan sabab ilaa hada marka loo eego xaalada cudurka, uu ilmo caafimaad qabaa u joogo guriga.
Waxaan la socon doonaa isbedelka xaalada waanan wadi doonaa qiimaynta fiditaanka fayraska.

Ilmahaygu wuxuu soo joogay goobaha fadaraysan (goobaha cudurku ku fidey) laakiin malaha calaamado. Ilmuhu ma joogi karaa guriga?

Caruurta iyo ardayda soo booqday goobaha fadaraysan waxay joogi karaan xanaanada iyo iskuulada ilaa inta ay caafimaad qabaan.

Laakiin waa in laga digtoonaadaa astaamaha, xataa kuwo yar yar, tusaale ahaan duufka, qufaca, cuno xanuunka iyo xumada, ilmuhu waa inuu joogo guriga ilaa inta uu caafimaadayo mar labaad.

Ilmahaygu wuxuu soo joogay goobaha fadaraysan (goobaha cudurku ku fidey) waxaanu leeyahay astaamo fudud oo hargab ah. Ma joogi karaa ilmuhu guriga?

Hadii ilmuhu soo joogay goobaha fadaraysan ama uu la kulmay qof qaba xanuunka oo kasoo muuqdaan calaamado, waa in uu joogaa guriga sida uu sheegayo hay’ada caafimaadka dadwaynuhu (Folkhälsomyndigheten).

Waa inaad sidaas daraadeed ku ilaalisaa ilmahaaga guriga marka uu muujiyo calaamdaha hargabka, tusaale ahaan duuf, qufac, cuno xanuun iyo xumad, ilaa ilmuhu ka caafimaadayo mar labaad. Ilmuhu waa inuu joogaa guriga laba maalmood astaamo la,aan.

Waa kuwee goobaha fadaraysan?

Fadlan booqo website ka hay’ada caafimaadka dadwaynaha si aad uga hesho warbixun dheeraada.

Waa kuwee wadamada iyo gobolada uu xafiiska arimaha dibada ee Sweden inoo sheegay inaan iska ilaalino?

Fadlan booqo website ka hay,ada caafimaadka dadwaynaha si aad warbixin dheeraada aad uga hesho.

Waxaa la xaqiijiyey in uu qoyskayga asiibay caabuq.Ma joogi karaa ilmahaygu guriga?

Marka la xaqiijiyo in qoyskaaga uu asiibay caabuq waxaa la ogaysiin qaybta daawaynta caabuqyada oo qoyskaaga siin la talin gaar ah. Go,aan ah karantiin ayey saraakiisha caafimaadku gelin doonaan qoyskaaga. Maamulaha iskuulkana waa lala xidhiidhi doonaa.

Ilmahaygu xasaasi ayuu ku yahay caabuqyada. Dhawr arday oo fasalka jooga ayaa qufacaya oo hindhisaya.Anigu waan ka warwarsanahay.

Fadlan la xidhiidh dhakhtarkaaga si uu kuula taliyo.Dhakhtarku wuu yaqaanaa ilmahaaga, waxaanu ku samayn karaa go,aamin saxa xaalada.

Waxa aan doonayaa in ilmahaygu joogo guriga oo aanu tegin xanaanada.isaga ama iyadu ma joogi karaa guriga?

Haa, isagu/iyadu wuu joogi karaa guriga

Waxaan doonayaa in ilmahaygu guriga joogo oo aanu tegin iskuulka hoose.Ma loo ogolaan karaa in iyada ama isagu joogo guriga?

Haddii ilmahaagu caafimaad qabo oo uu dhigto dugsiga hoose waa qasab inuu ka yimaado iskuulka waana muhiim in ardaygu tago iskuulka oo uu ka qaybgalo waxbarashada.Haddii kale ilmuhu wuxuu heli doonaa maqnaansho aan sax ahayn.

Anagu waxaan raacaynaa talooyinka Hay'ada caafimaadka dadwaynaha (Folkhälsomyndigheten) , taasoo macnaheedu yahay marka loo eego cudurada ma jirto sabab hada arday caafimaad qaba loogu ilaaliyo guriga oo uu uga joogo iskuulka.

Waxaan rabaa wiilkayga/gabadhayda dhigata dugsiga sare uu joogo guriga.Ma loo ogolyahay in sidaas isaga ama iyadu sameeyo?

Haddii aad haysato dhalinyaro caafimaad qabta oo dugsiga sare dhigata, isaga ama iyada waa inay ka qayb galaan waxbarashada.

Marka laga shakiyo caabuqa fayraska corona, ma la xidhi doonaa iskuulada?

Waxaan raacaynaa talooyinka Hay ‘ada caafimaadka dadwaynaha (Folkhälsomyndigheten) taasoo macnaheedu yahay inaanay jirin cadeyn cilmiyeed in la xidho iskuul ardaydiisu caafimaad qabaan ama la xidho iskuul si looga joojiyo fiditaanka caabuq bulshada dhexdeeda.

Waxaan isha ku hayn doonaa isbedelka xaalada waxaanan wadnaa qiimeynta fiditaanka fayraska.

Waa maxay daryeelka ilmaha (VAB) marka laga shakiyo aafo?

Xeerarka daryeelka ilmaha (VAB) waxaad ka heli kartaa Försäkringskassans website.

Maxay ku saabsantahay waxbarashada iskuulka muusigu?

Waxay ku saabsantahay waxbarashada iskuulka muusigu,waxay la mid tahay waxbarashada kale ee iskuulada.

caruurta caafimaad qabtaa waa inay ka qayb galaan waxbarashada,laakiin caruurta buktaa waa inay joogaan guriga.

Waxaa kale oo aad war bixin dheeri ka heli kartaa Skolverket website, oo ku saabsan fayraska Corona.